OKTOOBAR # 7

KANTAMA

Wargeyska xubnaha
Maahanmuuttajien Varautumis- ja Maanpuolustusyhdistys (MVM) ry



03 **Hab-fikirka**
Marka aad Finland u dareento dalkaaga

07 **U-diyaargarowgu ma aha cabsi**
balse waa waddo loo maro awoodda gudaha iyo amniga

08 **TALOOYINKA DIYAAR-GAROWGA**
Sidoo kale diyaari hab-fikirkaaga iyo aragtidaada

10 **Digniinaha khatarta ah mustaqbalka si toos ah ayay ugu soo dhacayaan**
taleefannada gacanta

TUSMADA

OKTOOBAR 2026 | Nro 7

03 **SALAANTA AGAASIMAHA FULINTA**
Hab-fikirka Marka aad Finland u dareento dalkaaga

04 **QORAALKA TIFAFTIRAHA**
Kalsoonida waxaa sidoo kale lagu dhisaa gudaha ururka

05 **ARAGTIDA KHABIIRKA**
Titta Collin

06 **DHACDOOYIN**
Tallaabada xigta ee waddada tababarenimada – Tababarka K2 oo la dhammaystiray

07 **HAWEENKA OO KA QAYB QAADANAYA**
U-diyaargarowgu ma aha cabsi, balse waa waddo loo maro awoodda gudaha iyo amniga

08 **TALOOYINKA DIYAAR-GAROWGA**
Sidoo kale diyaari hab-fikirkaaga iyo aragtidaada

09 **CODKA DHALLINYARADA**
Qofku wuxuu booskiisa bulshada Finland ka heli karaa waxbarasho, shaqo iyo ka-qaybgal

10-11 **WARARKA HADDA JIRA**
Digniinaha khatarta ah mustaqbalka si toos ah ayay ugu soo dhacayaan taleefannada gacanta

12 **EREYBIXINTA AMNIGA**

SALAANTA AGAASIMAHA FULINTA

HAB-FIKIRKA

Marka aad Finland u dareento dalkaaga

Aniga ahaan, Finland weligeed ma ahayn oo keliya dal aan ku noolahay. Tan iyo bilowgii, waxaan si xooggan u dareemayay in Finland ay tahay dalkayga. Waa dal aan doonayo inaan ka mid noqdo, mustaqbalkiisuna yahay mid aan doonayo inaan ka qaybqaato dhismihiisa, isla markaana aan diyaar u ahay inaan difaaco marka loo baahdo.

Si kastaba ha ahaatee, sannadihii la soo dhaafay waxaan fahmay in dareenka noocaas ahi aanu dadka oo dhan si isku mid ah ugu dhalan. Fahamkani ma ahayn mid igu soo dhacay hal maalin gudaheed, mana ahayn natiijada hal dhacdo oo keliya. Wuxuu si tartiib tartiib ah u kobcay muddo ka badan toban sano, anigoo dadka la shaqaynayay.



Shaho Jaff
Agaasimaha Fulinta
MVM ry

Aragti maskaxdayda ku reebtay raad

Tan iyo sannadkii 2015, waxaan ka soo shaqeeyay hawlo kala duwan oo la xiriira dadka asal ahaan ka soo jeeda waddamada kale ee u soo haajiray Finland. Waxaan ahaa isku-duwaha hawlaha machad Masiixi ah, kormeere masuul ka ah qaybta carruurta aan qaan-gaarin, markii dambena waxaan noqday ganacsade iyo tababare sare oo ka shaqeeya tababarka shaqo-u-diyaarinta ee lagu bixiyo afka hooyo, kaas oo aan anigu sameeyay oo horumariyay.

Hawlahaas kala duwan waxaan kula kulmay dad duruufo iyo waayo-aragnimo kala duwan leh. Waxaan dhegaystay waayo-aragnimadooda iyo rajadooda, waxaanan si dhow u arkay caqabadaha ay la kulmaan iyo fursadaha ay haystaan.

Si tartiib tartiib ah, waxaan bilaabay inaan fiiro gaar ah u yeesho arrin muhiim ah: dad badan ayaa laga yaabaa inaanay si buuxda u fahamsanayn kaalinta ay kaga jiraan bulshada Finland ama sida ay uga qaybqaadan karaan hawlaha bulshada.

Arrintu mar walba ma aha rabitaan la'aan ama xiiso la'aan. Mararka qaarkood, qofka si ku filan looguma baraarujin in Finland ay ka badan karto dal uu deggan yahay oo keliya. Finland waxay noqon kartaa bulshadiisa, bulsho uu saamayn ku yeelan karo mustaqbalkeeda, isla markaana uu wax qiimo leh ugu qaban karo.

Aragtidani waxay igu dhalisay inaan ka fikiro sida weyn ee hab-fikirka qofku u saamayn karo fursadaha uu ku heli karo booskiisa iyo kaalintiisa bulshada dhexdeeda.

Fursaddu waxay beddeli kartaa hab-fikirka

Sannadihii la soo dhaafay, waxaan si isa soo taraysa ugu qancay in xogta oo keliya aanay ku filnayn. Qofku waa inuu sidoo kale fahmaa waxa ay xogtaasi isaga shakhsi ahaan uga dhigan tahay.

Waxaan dadka uga warrami karnaa xuquuqda, waajibaadka, waxbarashada iyo nolosha shaqada. Laakiin ma si ku filan ayaan uga warrannaa in qof kastaa fursad u leeyahay inuu si firfircoon uga mid noqdo bulshada, isla markaana uu masuuliyad ka qaato arrimaha ina wada khuseeya?

Haddii aanu qofku ogeyn in albaab gaar ahi u furan yahay, sidee buu xitaa isugu dayi karaa inuu ka gudbo?

Hab-fikir diyaar ah qof kale looma dhiibi karo. Si kastaba ha ahaatee, waxaan kicin karnaa fikirka, soo bandhigi karnaa aragtiyo cusub, isla markaana abuuri karnaa fursado uu qofku isaga qudhiisu ku heli karo booskiisa iyo kaalintiisa bulshada dhexdeeda.

> *Hab-fikirkeennu wuxuu beddeli karaa sida aynu u aragno nafteena, midba midka kale iyo kaalinta aynu bulshada kaga jirno*

Fikradaha oo loo beddelo ficillo la taaban karo

Hawlaha ururka MVM ry, waxaan doonaynay inaan fikradahan u beddelno ficillo la taaban karo. Waxaan rabnaa inaan abuurno fursado ay dadku kaga qaybqaadan karaan hawlaha, wax ku baran karaan, isla markaana masuuliyad uga qaadan karaan amniga guud ee Finland. Waxaan aragnay sida ka-qaybgalku u xoojin karo kalsoonida qofka ee awoodihiisa iyo dareenkiisa ah inuu ka tirsan yahay bulshada uu ku nool yahay.

Hab-fikirku waa arrin qof walba u gaar ah. Uma arko in qof kasta looga baahan yahay inuu Finland u dareemo sida aan anigu u dareemo. Qof kastaa wuxuu leeyahay taariikh, waayo-aragnimo iyo waddo nololeed u gaar ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaan si adag u aaminsanahay in qof kasta la siiyo fursad uu ku fahmo muhiimadda uu ku leeyahay bulshada dhexdeeda.

Isla mar ahaantaana, dhammaanteen waa inaan dib u eegno hab-fikirkeenna iyo aragtideenna. Diyaar ma u nahay inaan dad cusub ku soo darno hawlaheenna? Ma midba midka kale ku aragnaa karti iyo fursado? Annaguna diyaar ma u nahay inaan masuuliyad qaadanno?

Markaan dib u milicsado safarkaygii billowday sannadkii 2015 iyo hawshii aan si wadajir ah u soo qabanay, waxaan si ka sii adag ugu qancay hal arrin: hab-fikirku wuxuu beddeli karaa sida aan nafteena, dadka kale iyo kaalinteena bulshada u aragno. Marka hab-fikirku isbeddelo, waxaa sidoo kale si cusub u furmi kara fursadaha ka-qaybgalka bulshada.

Aniga ahaan, Finland waa dalkayga. Waxaan rajaynayaa in dad badan oo kale ay helaan habka u gaarka ah ee ay ku dareemi karaan inay ka tirsan yihiin dalkan, isla markaana, waxa ugu muhiimsan, ay fahmaan in ficilladooduna ay muhiim u yihiin mustaqbalka Finland.

QORAALKA TIFAFTIRAHA

KALSOONIDA WAXAA SIDOO KALE LAGU DHISAA gudaha ururka

Ari Pakarinen, Agaasimaha Fulinta, MPKL

Ururka Isu-diyaarinta iyo Difaaca Qaranka ee Dadka Soo-galootiga ah (Maahanmuuttajien Varautumis- ja Maanpuolustusyhdistys, MVM) ayaa si qorshaysan oo xawli leh uga dhisanayay booskiisa qaybta hawlaha difaaca qaranka ee mutadawiciinta ku salaysan. MVM waxay si firfircoon u dhistay shabakad xiriir oo ay la leedahay hay'adaha iyo dadka go'aan-qaataha ah ee ka hawlgala heerarka kala duwan ee bulshada iyo qaybta difaaca qaranka. Hawshaasi way sii socon doontaa, balse waxaa la gaaray waqtigii diiradda loo wareejin lahaa marxaladda xigta ee hawlaha ururka.

Marxaladda xigta, oo diiradda saaraysa adeegyada xubnaha, ayaa durba bilaabatay. Xubnaha firfircoon ee ururku waxay heleen aqoon iyo tababaro la xiriira tababarka difaaca qaranka ee MPK iyo sidoo kale dhinaca ilaalinta dadweynaha. Waxbarashadooda iyo xuquuqda ay ku heleen inay u shaqeeyaan tababarayaal iyo hoggaamiyeyaal koorsooyin ayaa aasaas adag u noqonaya bilaabista iyo horumarinta hawlaha tababarka ee ururka.

Qabanqaabada koorsooyinku waxay u baahan tahay qorshayn wanaagsan, waana in xubnaha ururkana laga qaybgeliyo hawshaas.

Xubintu waa inay noqotaa awood iyo khayraad wax ku ool ah

Ururka looma dhisin oo keliya inuu noqdo hay'ad maamul oo ay koox yar oo keliya ogtahay halka ay wax marayaan. Ururku waa qaab-dhismeed u adeegaya xubnihiisa. Xubnuhu waxay filayaan inay wax u dhigma ka helaan khidmadda xubinnimada ee ay bixiyaan.

Aasaaska hawlaha ururku wuxuu ku dhisan yahay in xubin kasta la siiyo adeegyada lagu qeexay xeerarka iyo qorshayaasha hawlgalka ee ururka. Adeegyadan waxaa ka mid noqon kara muxaadarooyin, koorsooyin iyo hawlo kale oo xoojiya dareenka xubnaha ee midnimada iyo ka-mid-ahaanshaha ururka.

Dareenka midnimada iyo wadajirka ayaa dhisa kalsooni dhex marta xubnaha.

Isgaarsiintu waa tiir muhiim u ah dhismaha kalsoonida

Marka dadku si wadajir ah u shaqaynayaan, waxaa loo baahan yahay isgaarsiin hufan oo shaqaynaysa. Isgaarsiintu waa inay noqotaa mid labada dhinacba u furan, daahfuran, isla markaana, waxa ugu muhiimsan, si fudud loo fahmi karo.

Majaladda KANTAMA waa warbaahin uu ururku u adeegsado faafinta macluumaadka. Maadaama ay ku soo baxdo luqado kala duwan, waxay bixisaa fursad wanaagsan oo lagu faafiyo xog sax ah. Shaqada majaladdu waa inay dhiirrigeliso doodaha iyo falanqaynta, isla markaana ay xubnaha caadiga ah siiso madal ay fikradahooda ku soo bandhigi karaan ugana qaybqaadan karaan hawlaha ururka.

Dhammaan isgaarsiinta waa in laga saaraa wax kasta oo keeni kara jahawareer, carqalad ama xog khaldan. Waqtiga farriinta la gudbinayo ayaa sidoo kale ah arrin go'aaminaysa guusha isgaarsiinta. Goorma iyo sidee ayay tahay in laga warbixiyo dhacdooyinkii hore, sideese loo gudbinayaa macluumaadka ku saabsan dhacdooyinka soo socda?

Isgaarsiin guulaysata waxay MVM uga baahan tahay feejignaan, si farriimaha loo gudbiyo iyaga oo sax ah, aanay carqalad ku dhicin, isla markaana ay gaaraan waqtiga ku habboon.

ARAGTIDA KHABIIRKA



Titta Collin

Waxay haysataa shahaadada mastarka ee cilmi-nafsiga, waa guddoomiyaha ururka Tampereen Seudun Reserviläisnaiset ry, waana mutadawac ka tirsan MPK

Finland waxay noqonaysaa bulsho sii kordhaysa oo kala duwanaansho badan leh, waxaana sii badanaya dadka halkan ku nool ee asalkooda, afkooda iyo xididdadooda dhaqan ay ka soo jeedaan dalal ka baxsan xuduudaha Finland. Bulshada sii kala duwanaanaysa dhexdeeda, waxaa muhiimad weyn yeelanaya habka aan isu wajahno iyo sida aan u dhisno nolol maalmeed ay wadaagaan dhammaanteen.

Hab-fikirka iyo aragtideennu waxay saamayn ku yeeshaan sida aynu u fasiranno dadka kale, xaaladaha iyo dunida nagu xeeran. Hase yeeshee, aragtiyadu iskood uma samaysmaan. Waxay ku dhismaan waayo-aragnimadeenna, barbaarintayada iyo deegaanka aynu ku noolnahay. Waxa kale oo qaabeeya sheekooyinka aynu ka maqalno dadka kale iyo kooxaha kala duwan.

Sidaas darteed, xogta oo keliya mar walba kuma filna in lagu beddelo aragtida qofka. Xitaa marka aynu helno xaqiiqooyin cusub, badanaa waxaynu ku eegnaa aragtiyihii iyo waxyaabihii aynu hore u aaminsanayn. Sidaa awgeed, garashada halka ay ka soo jeedaan fikradaheenna iyo fahamkeenna ayaa shardi u ah inaan fahanno habka aynu u fikirno, isla markaana, haddii loo baahdo, aynu wax uga beddelno.

Dad badan ayaa garanaya xaalad ay fikraddii hore ee ay qof kale ka qabeen isbeddel ku samaysay kaddib markii ay si shakhsi ah ula kulmeen. Daraasadaha cilmiyeedna waxay muujinayaan in wada-shaqaynta dhow ee lagu gaarayo yool la wadaago ay yarayso fikradaha eexda ku dhisan si ka waxtar badan marka loo eego kordhinta xogta oo keliya.

Kalsoonidu waxay ka dhalataa waayo-aragnimo: marka qofku si joogto ah oo la isku halayn karo u dhaqmo, masuuliyad qaato, isla markaana muujiyo inuu mudan yahay in lagu kalsoonaado.

Bulshooyinka iyo ururradu waxay bixiyaan waddo dabiici ah oo ay dadku isku bartaan, kuna dareemaan inay ka tirsan yihiin koox. Asal iyo waayo-aragnimo kala duwan waxay kobcin karaan aqoonta, xirfadaha iyo awoodda bulshooyinku u leeyihiin inay ka jawaabaan caqabadaha nolol maalmeedka.

Taasina waxay u baahan tahay wada-hadal, dabacsanaan iyo rabitaan lagu dhisayo habab shaqo oo la wadaago. Fursado badan ayaa u furma dadka ku dhiirrada inay wax ogaadaan oo ay ka qaybqaataan hawlaha bulshada.

Isla mar ahaantaana, annaga oo Finnish ah waa inaan isweydiinnaa sida ay dhab ahaan ugu fududahay qofka cusub inuu bulshada ku soo biiro. Ma ku casuunnaa qofka cusub inuu wada-hadalka ka qaybqaato? Ma u sharraxnaa xeerarka aan qornayn ee bulshada? Ma siinnaa fursad dhab ah oo uu kaga qaybqaato hawlaha?

Hawlaha difaaca qaranka ee mutadawiciinta ku salaysan, muhiimadda hab-fikirka iyo aragtidu waxay si cad uga muuqataa ficillada. Ku soo biirista hawlahan waxay muujinaysaa rabitaanka qofka ee ah inuu wax ka barto bulshada Finland iyo taariikhdeeda, inuu masuuliyad qaato, isla markaana uu ka qaybqaato dhismaha amniga guud.

Kalsoonidu waxay ku dhisantaa ficil: in la dhegaysto tilmaamaha, si wadajir ah loo tababarto, isla markaana qof kastaa guto waajibaadkiisa isaga oo qayb ka ah kooxda.

Qofka asal ahaan ka soo jeeda waddan kale ee ka qaybqaata hawlahan wuxuu sidoo kale keeni karaa aragtiyo iyo aqoon ay bulshada oo dhan ka faa'iidaysan karto.

Muhiimadda hab-fikirka iyo aragtidu waxay si gaar ah u soo baxdaa marka aanay wax walba si fudud u socon. Aragti wanaagsan macnaheedu ma aha in la aqbalo takoorka ama si aan habboonayn loola dhaqmo qofka. Waxay ka dhigan tahay rabitaanka ah in la sii wado dadaalka, iyada oo aan hal waayo-aragnimo oo xun lagu salayn xukun guud oo laga gaaro bulshada oo dhan.

Si kastaba ha ahaatee, masuuliyaddu ma aha inay ku koobnaato qofka cusub oo keliya. Bulshadu waa inay muujisaa in qof kasta oo u hoggaansama xeerarka guud ee la wadaago, isla markaana masuuliyad qaata, lagu soo dhoweynayo inuu ka qaybqaato dhismaha Finland.

Kalsoonidu waxay ku dhisantaa ficil: in la dhegaysto tilmaamaha, si wadajir ah loo tababarto, isla markaana qof kastaa guto waajibaadkiisa isaga oo qayb ka ah kooxda

Tallaabada xigta ee waddada tababarenimada – Tababarka K2 oo la dhammaystiray



Qaar ka mid ah kooxda ururka MVM ry ayaa bishii Oktoobar ka qaybqaatay tababarka hoggaamiyeyaasha koorsooyinka ee MPK K2. Tababarkani wuxuu daba socdaa tababarka K1, wuxuuna qayb ka yahay waddada horumarinta tababarayaasha ee MPK. Ujeeddadiisu waa in la sii xoojiyo aqoonta iyo xirfadaha tababarenimada, isla markaana la horumariyo awoodda qorshaynta, fulinta iyo hoggaaminta koorsooyinka.

Tani waa tallaabo aad muhiim ugu ah ururkeenna. Ujeeddadeennu ma aha oo keliya inaan dadka Finland u soo haajiray ku dhiirrigelinno inay ka qaybqaataan tababarrada, balse sidoo kale inaan u dhisno waddo ay iyaguna ku horumari karaan tababarayaal ahaan, aqoontoodana ugu gudbin karaan dadka kale.

Kooxdeenna waxaa hadda ku sii badanaya dadka dhammaystay tababarrada tababarayaasha ee MPK iyo tababarrada kale ee la xiriira amniga iyo u-diyaargarowga xaaladaha degdegga ah. Tani waxay xoojinaysaa aqoonta iyo xirfadaha ururka, waxayna kordhinaysaa fursadaha aan mustaqbalka ku qabanqaabin karno tababbarro ku baxa luqado kala duwan, kuwaas oo loogu talagalay kooxo kala duwan.

Dhacdooyinka soo socda

1.11.2026 – Kulanka xog-warranka dhallinyarada

Mawduuca:
Waajibka adeegga milatariga, amniga guud ee bulshada, difaaca qaranka ee mutadawiciinta ku salaysan, iyo fursadaha waxbarasho iyo shaqo

Waqtiga:
14.00

Goobta:
Finpolar Nuoriso Yhdistys ry, Kornetintie 6 C, 00380 Helsinki.

Kulanka waxaa la qabanqaabinayaa iyadoo lala kaashanayo ururka Finpolar Nuoriso Yhdistys ry. Waxaa kulanka ka jiri doona turjumaad afka Turkiga ah. Qaxwo ayaa la bixin doonaa.

4.11.2026 – Webinar-ka NASTAisku

Mawduuca:
Sidee ayay dadka asal ahaan ka soo jeeda waddamada kale uga qaybqaadan karaan dhismaha Finland ammaan badan, isla markaana u xoojin karaan awoodda bulshada ee u adkaysiga dhibaatooyinka iyo xaaladaha qalalaasaha?

Waqtiga:
18.00–19.00

Goobta:
Internetka, Zoom.

Wakiillo ka socda MVM ry ayaa hawlaha ururka ku soo bandhigi doona webinar ay qabanqaabinayso Naisten Valmiusliitto.

Xiriirka lagu soo biirayo webinar-ka waxaa lagu daabici doonaa bogagga internetka iyo baraha bulshada ee Naisten Valmiusliitto iyo MVM ry. Duubista webinar-ka ayaa mar dambe lagu daabici doonaa bogagga internetka.

12.11.2026 – Kulanka wargelinta ee afka Ingiriisiga

Mawduuca:
Kulanka xog-warranka ee afka Ingiriisiga

Waqtiga:
17.00

Goobta:
Stadin ammattiopisto, hoolka auditorium-ka ee xarunta Vilppulantie, Vilppulantie 14, 00700 Helsinki.

Kulanka waxaa la qabanqaabinayaa iyadoo lala kaashanayo ururka Think Africa ry.

Luqadda kulanku waa Ingiriisi.

HAWEENKA OO KA QAYB QAADANAYA

U-diyaargarowgu ma aha cabsi, balse waa waddo loo maro awoodda gudaha iyo amniga



Olena Niemceva

Dareenka amnigu si dhakhso ah ayuu isu beddeli karaa marka ay dunida ka dhacaan dhacdooyin si dhow u taabanaya nolosheenna gaarka ah. Laakiin ma suuragal baa in welwelka iyo hubanti la'aanta loo beddelo ficil? U-diyaargarowguna ma xoojin karaa dareenka amniga?

Olena Niemceva, oo ka qaybqaadata hawlaha ururka MVM ry, ayaa ka warramaysa sida dhacdooyinka Ukraine ay u beddeleen aragtideeda ku aaddan amniga iyo sababta ay maanta aqoonta, tababarka iyo wada-shaqaynta ugu leeyihiin muhiimad ka duwan tii hore.

Sidee ayay dhacdooyinka Ukraine u beddeleen dareenkaaga amniga?

Dhacdooyinka ka dhacay Ukraine waxay qalbigayga ku abuureen xanuun iyo welwel qoto dheer. Marka aad aragto sida noloshii aad taqaanay ay u burburayso, way adag tahay inaad ka fogaato cabsida mustaqbalka laga qabo. Waxaase ka sii daran, ma fududa in laga fogaado fikirka ah in wax la mid ahi ka dhici karaan halkan Finland, oo ii noqotay hoygayga.

Bilowgii, dareenka aqoon-la'aanta iyo nuglaanshuhu maalin kasta ayuu ila socday. Waxaan dareemayay in qof keli ahi aanu wax badan ka qaban karin marka ay jiraan dhibaatooyin waaweyn oo caalami ah.

Maxaa kaa caawiyay inaad cabsida u beddesho ficil?

Wax walba waxay bilaabeen inay isbeddelaan markii aan go'aansaday inaanan u hoggaansamin argagaxa. Waxaan go'aansaday inaan tallaabo qaado. Waxaan ku biiray hawlaha MVM ry, markii aan bilaabay inaan la shaqeeyo koox aan isku aragti nahayna, waxaan arkay baaxadda shaqada maalin kasta Finland looga qabto badbaadada dadka.

Shaqadaas waxaa ka mid ah tababarka dadweynaha, diyaarinta tilmaamo cad oo lagu dhaqmo marka ay dhacaan xaalado aan caadi ahayn, iyo qorshayn nidaamsan oo u-diyaargarow ah oo laga sameeyo qaybaha kala duwan ee bulshada.

Waayo-aragnimadani waxay beddeshay fahamkaygii ku saabsanaa amniga. Welwelkii waxaa beddelay aqoon iyo faham ah in ay jiraan habab wax looga qabto xaaladaha kala duwan, xirfado iyo dad lala shaqayn karo. Waxaa hareerahayga ku soo kordhay dad ila wadaaga rabitaanka ah inaan ilaalinno deegaanka aynu ku wada noolnahay, bulshada wax u tarno, isla markaana dadka kale caawinno.

Muxuu u-diyaargarowgu maanta adiga kuu yahay?

Marka qofku ogaado sida loo dhaqmo xaaladaha kala duwan, cabsidu way yaraataa. Waxaana beddela kalsooni deggan, diyaar u ahaanshaha qaadashada masuuliyadda iyo awoodda lagu caawin karo dadka kale.

Maanta waxaan si buuxda u aaminsanahay in amniga dhabta ahi ku dhisan yahay aqoon, is-caawin iyo dadaalka qof kasta. Waxbarashada, u-diyaargarowga xaaladaha degdegga ah iyo ka-qaybgalka hawlaha MVM ry waxay ii yihiin hab aan uga qaybqaato dhismaha amniga iyo mustaqbalka aynu wadaagno.

Ka-qaybgalkaagu ma beddelay dareenkaaga ku aaddan ka-mid-ahaanshaha Finland iyo bulshada Finnishka?

Haa, shaki la'aan. Hadda waxaan fahamsanahay inaan aniguna qayb muhiim ah ka ahay bulshada Finland, isla markaana aan aqoontayda iyo xirfadahayga wax ugu tari karo bulshada. Waxaan sidoo kale ogaaday in yool la wadaago uu mideyn karo dad ka kala yimid jinsiyado iyo asal kala duwan.

Sidoo kale diyaari hab-fikirkaaga iyo aragtidaada

U-diyaargarowgu kuma koobna oo keliya kaydka agabka daruuriga ah ee guriga, tooshka ama xirfadaha gargaarka degdegga ah. Mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee u-diyaargarowga waa hab-fikirka iyo aragtida qofka. Waxay saamayn ku yeeshaan sida aynu u wajahno khataraha iman kara, in aynu hore ugu sii diyaar garowno iyo sida aynu u dhaqanno marka ay xaalad dhab ahi dhacdo.

Ha ku fikirin: “Annaga waxba nama dhacayaan”

Haddii aynu aaminsannahay inaan waxba nagu dhacayn, sidoo kale ma aragno baahida loo qabo u-diyaargarowga. U-diyaargarowgu wuxuu ka bilaabmaa aqbalidda xaqiiqda ah in xaalado lama filaan ahi ay ka dhici karaan nolol maalmeedkeenna. Ujeeddadu ma aha in la sugo waxa ugu xun, balse waa in loo diyaar ahaado in si habboon wax looga qabto haddii ay wax dhacaan.

Ha ku noolaan welwel joogto ah

Ujeeddada u-diyaargarowgu ma aha in qofku cabsi ku noolaado ama uu si joogto ah uga fikiro waxyaabaha xun ee dhici kara. Taas beddelkeeda, aqoonta iyo diyaar-garowgu waxay yareyn karaan hubanti la’aanta, waxayna kordhin karaan dareenka amniga. Marka aad ogtahay inaad diyaar tahay, uma baahnid inaad wax walba horay uga sii cabsato.

Xooji xiriirka aad la leedahay dadka kale

U-diyaargarowgu ma aha arrin qofka keliya khusaysa. Marka ay dhacaan xaalado carqaladaynaya nolol maalmeedka ama xaalado qalalaase, badanaa waxaan u baahanahay dadka kale, sida qoyska, saaxiibbada, deriska iyo bulshada aynu ka tirsan nahay.
Xiriirrada wanaagsan iyo kalsoonida dadka dhexdooda ka jirta iyaguna waa qayb muhiim ah oo ka mid ah u-diyaargarowga. Qofku wuxuu qof kale u noqon karaa il muhiim ah oo amni iyo taageero.

Diyaar u noqo inaad wax barato

U-diyaargarowgu macnaheedu ma aha inaad wax walba hore u taqaan. Waxa muhiimka ahi waa rabitaanka inaad wax barato, ku tababarto oo aad horumariso xirfadahaaga ka hor inta aan si dhab ah loogu baahnayn. Marka ay dhacdo xaalad qalalaase, way fududahay in si habboon wax looga qabto haddii aanay wax walba kugu noqon waayo-aragnimo cusub oo markii ugu horreysay ku soo wajahda.

Diyaar u noqo inaad la qabsato xaaladaha isbeddelaya

Mar walba wax walba uma dhacaan sidii aynu u qorshaynay, mana suuragal aha in xaalad kasta horay loogu sii diyaar garoobo. Hab-fikirka wanaagsan ee u-diyaargarowga waxaa ka mid ah awoodda la qabsiga xaaladaha isbeddelaya. Haddii qorshaha A uu shaqayn waayo, raadi qorshaha B.

Hab-fikirka iyo aragtidu waa qayb ka mid ah u-diyaargarowga

Horay uma ogaan karno waxa dhici doona, mana xakamayn karno wax kasta oo nagu xeeran. Si kastaba ha ahaatee, waxaan samayn karnaa diyaar-garow, wax baran karnaa, kalsooni la dhisi karnaa dadka kale, isla markaana ku tababaran karnaa sida wax looga qabto xaaladaha aan hubanti lahayn.
Hab-fikirka wanaagsan ee u-diyaargarowgu ma aha cabsi laga qabo waxa dhici kara, balse waa kalsooni ku dhisan in aan garanayo sida aan u dhaqmi lahaa haddii ay wax dhacaan.



QOFKU WUXUU BOOSKIISA BULSHADA FINLAND KA HELI KARAA WAXBARASHO, SHAQO IYO KA-QAYBGAL

Himdad Shwani, oo 29 jir ah, ayaa Finland u soo guuray isaga oo carruur ah sannadkii 2005. Maanta wuxuu u shaqeeyaa dhakhtar, isaga oo shaqadiisa uga qaybqaata ilaalinta fayo-qabka iyo amniga bulshada Finland. Sheekadiisu waxay muujinaysaa in waxbarashada, shaqaynta iyo rabitaanka ka-qaybgalku ay furi karaan fursado badan, isla markaana xoojin karaan dareenka ah in qofku qayb ka yahay bulshada.

Carruurnimadii Finland ilaa xirfadda dhakhtarnimada

Himdad Shwani wuxuu ku dhashay waddan shisheeye sannadkii 1996, wuxuuna Finland u soo guuray sannadkii 2005. Waxbarashadiisa dugsiga ee Finland wuxuu ka bilaabay fasalka afraad, kaddibna wuxuu sii watay waxbarashada dugsiga sare ee hoose iyo dugsiga sare. Waxbarashadiisa jaamacadeed ee caafimaadka wuxuu ku qaatay dalka dibaddiisa.
U soo guurista waddan cusub iyo barashada luqad cusub markii hore ma ahayn arrimo fudud, balse xiisaha uu u qabay waxbarashada iyo rabitaankiisa waxbarasho ayaa ka caawiyay inuu hore u socdo.

“Mar walba waxaan jeclaa dugsiga, waxaanan xiisayn jiray inaan wax cusub barto. Nidaamka waxbarashada Finland wuxuu i siiyay aasaas wanaagsan oo aan ugu gudbi karo waxbarashada heerarka sare,” ayuu Himdad sheegay.
Inkasta oo xididdadiisu ka soo jeedaan meel kale, Finland waxay u tahay hoygiisa. Halkan ayuu ku koray, waxbarashadiisa ku qaatay, kuna dhistay noloshiisa shaqo.

Shaqo kasta waxay qayb ka tahay sheekada koboca qofka

Ka hor inta aanu Himdad noqon dhakhtar, wuxuu ka soo shaqeeyay hawlo badan oo kala duwan. Wuxuu garoonka diyaaradaha ka soo shaqeeyay baaritaanka amniga, wuxuu ka shaqeeyay kafateeri, wuxuu ahaa darawal taksi, wuxuu wax ku iibin jiray suuqa, wuxuuna sidoo kale ahaa kaaliye dugsi.

Waayo-aragnimadani waxay muujinaysaa inaan loo baahnayn in mustaqbalka qofka lagu dhiso hal waddo oo keliya. Shaqooyinka kala duwan waxay fursad u siinayaan qofka inuu wax barto, dad cusub la kulmo, isla markaana fahmo sida bulshadu u shaqayso.

Maanta Himdad wuxuu inta badan xarun caafimaad uga shaqeeyaa dhakhtar guud. Intaa waxaa dheer, wuxuu bukaanno ku qaabilaa qaybta caafimaadka gaarka loo leeyahay, wuxuuna sidoo kale qabtaa shaqada dhakhtarka heeganka ah ee isbitaalka.

“Waan jeclahay shaqadayda, sababtoo ah maalin kasta way ka duwan tahay maalintii ka horreysay, waxaanan fursad badan u helaa inaan dadka la macaamilo. Mararka qaarkood shaqadu way adag tahay, balse sidoo kale waa shaqo lagu qanco.”

Shaqayntu sidoo kale waa ka-qaybqaadasho amniga guud ee bulshada

Amniga guud ee bulshada kuma koobna oo keliya difaaca qaranka ama hawlaha hay’adaha dowladda. Waxa kale oo lagu dhisaa nolol maalmeedka bulshada dhexdeeda, sida daryeelka caafimaadka, waxbarashada, goobaha shaqada iyo wada-shaqaynta dadka.

Shaqada Himdad ee dhakhtarnimo waa tusaale muuqda oo arrintan caddaynaya. Isaga oo bukaannada daweynaya, caafimaadka dadka ilaalinaya kana qaybqaadanaya hawlaha daryeelka caafimaadka, wuxuu gacan ka geysanayaa xoojinta awoodda bulshada ee ay ku gudan karto hawlaheeda.

Isla mabda’ani wuxuu khuseeyaa xirfado kale oo badan. Macallimiinta, darawallada, shaqaalaha dukaamada, ganacsatada iyo xirfadlayaal kale oo badan ayaa qabta shaqooyin muhiim u ah shaqaynta iyo horumarka bulshada.

Amniga bulshada laguma dhiso oo keliya xaaladaha degdegga ah ama xilliyada qalalaasaha. Waxaa la dhisaa maalin kasta, iyadoo wax la baranayo, shaqo la qabanayo, masuuliyaddana laga gudanayo hawsha qof walba u taalla.

Dareenka ka-mid-ahaanshuhu wuxuu ka dhashaa ka-qaybgalka

Himdad wuxuu muhiimad weyn siinayaa hawlaha Ururka Isu-diyaarinta iyo Difaaca Qaranka ee Dadka Soo-galootiga ah, MVM ry, maadaama ururku ku dhiirrigeliyo dadka asal ahaan ka soo jeeda waddamada kale inay ka qaybqaataan hawlaha bulshada, gaar ahaan dhinacyada amniga iyo u-diyaargarowga xaaladaha degdegga ah.

“Qof kasta oo ku nool Finland wuxuu bulshada ku leeyahay door u gaar ah, wuxuuna fursad u leeyahay inuu saamayn ku yeesho fayo-qabkeeda iyo amnigeeda. U-diyaargarowga xaaladaha degdegga ah iyo amniga bulshada waa arrimo ina wada khuseeya dhammaanteen, iyada oo aan loo eegin asalkeenna.”

Aragtidiisa, ka-qaybgalka hawlaha ururradu wuxuu sidoo kale horumarin karaa isdhexgalka bulshada, xoojin karaa dareenka ka-mid-ahaanshaha, wuxuuna dadka ka caawin karaa inay si wanaagsan u fahmaan sida bulshada Finland u shaqayso.

Ka-qaybgalku wuxuu fursad siinayaa dadka inay la kulmaan dad cusub, bartaan xirfado, isla markaana ogaadaan in qof kastaa leeyahay wax uu ku biirin karo bulshada aynu wadaagno.

Farriin uu u dirayo dhallinyarada: Rumaysta fursadihiinna, mustaqbalkiinnana dhista

Talada ugu muhiimsan ee Himdad uu siinayo dhallinyarada kale ee asal ahaan ka soo jeeda waddamada kale waa mid fudud: rumaysta awoodihiinna iyo fursadihiinna, kuna dadaala inaad gaartaan yoolalkiinna.
“Finland waxaa ka jira fursado wanaagsan oo lagu helo waxbarasho, lagu shaqeeyo, qoys lagu dhisto, laguna abuuro mustaqbal wanaagsan naftaada iyo qoyskaagaba. Waxaa habboon in fursadahaas sida ugu wanaagsan looga faa’iidaysto.”

Wuxuu sidoo kale carrabka ku adkaynayaa muhiimadda ay leedahay la kulanka dadka kale iyo ka-qaybgalka bulshada. Sida uu qabo, ilaalinta dhaqankaaga, diintaada iyo aqoonsigaaga gaarka ahi caqabad kuma aha inaad guul ka gaarto bulshada Finland.
“Waxaan rajaynayaa in dhallinyaradu helaan fursad ay naftooda ku horumariyaan, uga faa’iidaystaan awoodahooda gaarka ah, isla markaana ay iyaguna wax u taraan dadka kale.”

Sheekada Himdad waxay ina xusuusinaysaa in ka-mid-ahaanshaha bulshadu aanu ahayn dareen keliya. Waxa kale oo uu ka muuqdaa ficillada: waxbarashada, shaqaynta, caawinta dadka kale iyo qaadashada masuuliyadda wadajirka ah.

Qof kasta oo dhallinyaro ahi wuxuu jidkiisa gaarka ah uga qaybqaadan karaa dhismaha mustaqbalka Finland, isla markaana xoojin karaa amniga guud ee dalka.

Digniinaha khatarta ah mustaqbalka si toos ah ayay ugu soo dhacayaan taleefannada gacanta

Nidaamka digniinaha khatarta ah ee Finland ayaa dib-u-habayn lagu samayn doonaa bisha Nofeembar 2026. Nidaamka cusub ee FI-Alert wuxuu hay'adaha dowladda u suurtagelin doonaa inay digniinaha khatarta ah si toos ah ugu diraan taleefannada gacanta ee ku yaalla aagga ay khatartu ka jirto. Helitaanka digniinahan uma baahna in la rakibo barnaamij gaar ah.



Madaxweynaha Jamhuuriyadda Finland ayaa ansixiyay wax-ka-beddelka sharciga digniinaha khatarta ah, kaas oo dhaqan geli doona 1-da Nofeembar 2026. Isbeddelka sharciga ayaa Finland u suuragelinaya inay hirgeliso hab cusub oo digniinaha lagu gudbiyo, kaas oo lagu magacaabo FI-Alert. Nidaamkani wuxuu kaabaya hababka hadda loo isticmaalo digniinta iyo wargelinta dadweynaha.

Ujeeddada dib-u-habayntan waa in la wanaajiyo gaarsiinta fariimaha digniinta dadweynaha, lana dedejiyo gudbinta digniinaha khatarta ah, gaar ahaan xaaladaha aan caadiga ahayn. Isbeddellada ku yimid xaaladda amniga ayaa sii xoojiyay muhiimadda ay leedahay isgaarsiin degdeg ah oo lagu kalsoonaan karo oo ka timaadda hay'adaha dowladda.

Sidee ayuu nidaamka cusub u shaqaynayaa?

FI-Alert wuxuu ku shaqaynayaa tiknoolajiyadda Cell Broadcast, oo ah hab fariimaha loogu baahiyo taleefannada ku xiran shabakadda taleefannada gacanta ee aag cayiman. Tiknoolajiyaddan waxay hay'adaha dowladda u suurtagelinaysaa inay digniinaha khatarta ah ku diraan taleefannada gacanta ee ku yaalla goob juqraafi ahaan loo cayimay, ku dhowaad isla markiiba.

Faa'iidada ugu weyn ee nidaamkani waa inaan qofka digniinta helaya looga baahnayn inuu rakibo barnaamij gaar ah ama iska diiwaangeliyo adeeg. Digniinta waxaa si toos ah loogu gudbin karaa taleefannada ku habboon nidaamka ee ku yaalla aagga ay khatartu ka jirto, iyadoo la adeegsanayo shabakadda taleefannada gacanta.

Awoodda lagu beegsan karo aag gaar ah waxay suuragelinaysaa in digniinaha loo diro dadka ay xaaladda khatartu sida tooska ah u saamaynayso. Xaaladaha noocaas ah waxaa ka mid noqon kara shilalka waaweyn, sii-daynta walxaha halista ah ama dhacdooyin kale oo u baahan in dadku si degdeg ah isu ilaaliyaan.

Sidee ku garan kartaa digniinta khatarta ah ee taleefankaaga ku soo dhacda?

Digniinta khatarta ah ee lagu soo diro nidaamka FI-Alert way ka duwan tahay farriimaha qoraalka caadiga ah (SMS). Waxay shaashadda taleefanka uga soo muuqanaysaa ogeysiis gaar ah, kaas oo ay la socon karaan dhawaaq digniin oo gaar ah iyo gariir.

Dhawaaqa digniinta iyo gariirku way shaqayn karaan xitaa marka taleefanka loo dejiyay habka aamusnaanta. Sidaas ayaa digniintu si dhakhso ah u soo jiidanaysaa dareenka qofka helaya.

Marka aad hesho ogeysiiska, waa inaad akhridaa tilmaamaha ku jira oo aad raacdaa.

Hababka hadda jira ee digniinaha waa la sii wadi doonaa

FI-Alert ma beddelayo hababka hadda loo isticmaalo gudbinta digniinaha khatarta ah, balse wuxuu noqonayaa hab dheeraad ah oo kaabaya.

Digniinaha khatarta ah waxaa mustaqbalka lagu sii gudbin doonaa raadiyaha iyo telefishinka. Taleefannada casriga ah waxaa sidoo kale digniinaha laga heli karaa barnaamijyada 112 Suomi iyo Yle. Intaa waxaa dheer, digniinaha waxaa lagu daabici doonaa bogagga internetka ee 112.fi iyo yle.fi, iyo sidoo kale bogga 112 ee adeegga Teksti-TV.

Digniinta guud ee khatarta waxaa weli dadweynaha loogu gudbin karaa seerinnada digniinta.

Hirgelinta nidaamka cusub ee FI-Alert waxay xoojinaysaa nidaamka Finland ee digniinaha khatarta ah ee loo adeegsado habab kala duwan. Ujeeddadu waa in xogta ku saabsan xaalad khatar ah ay si degdeg ah oo lagu kalsoonaan karo u gaarto inta ugu badan ee suurtagalka ah ee dadka ku sugan aagga khatartu ka jirto.

Xigasho: *Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Finland, 15.10.2026 – Sharciga digniinaha khatarta ah waxaa lagu darayaa hab cusub: digniinaha khatarta ah mustaqbalka si toos ah ayay ugu soo dhacayaan taleefannada gacanta.*

SU'AALO iyo JAWAABO

FI-ALERT

Sidee ayuu adeeggu u shaqeeyaa?

01 Adeeggu wuxuu ku salaysan yahay tiknoolajiyadda Cell Broadcast. Digniinta khatarta ah waxaa loo diraa aag juqraafi ahaan cayiman iyadoo la adeegsanayo saldhigyada gudbiya calaamadaha shabakadda taleefannada gacanta. Digniintu waxay isku mar gaartaa dhammaan taleefannada gacanta ee 4G iyo 5G ee ku yaalla aaggaas, iyada oo aan loo eegin shirkadda isgaarsiinta ee aad ka isticmaasho adeegga taleefankaaga.
Tani waxay suurtagelinaysaa in digniinaha si degdeg ah loo gudbiyo, gaar ahaan xaaladaha degdegga ah.

Maxaad samaynaysaa marka aad hesho digniin khatar ah?

02 Marka aad hesho digniin khatar ah, isdeji oo raac tilmaamaha ku qoran farriinta ogeysiiska.
Digniintu waxay mar walba sheegaysaa tallaabooyinka ay tahay inaad isla markiiba qaaddo. Waxa kale oo lagu caddeynayaa hay'adda dowladda ee soo saartay digniinta.
Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa bogagga internetka ee hay'adaha dowladda iyo kanaalladooda kale ee rasmiga ah

Taleefannadee ayaa qaabili kara digniinaha khatarta ah?

03 Adeeggu wuxuu ka shaqeeyaa dhammaan taleefannada 4G iyo 5G ee taageera tiknoolajiyadda Cell Broadcast, taas oo laga helo inta badan taleefannada gacanta.
Qalabka ugu da'da weyn ee isticmaala shabakadaha 2G ama 3G oo keliya ma qaabili karaan digniinaha khatarta ah ee si toos ah loogu soo diro taleefanka iyadoo la adeegsanayo shabakadda isgaarsiinta. Waxaa la isku dayi doonaa in dadkaas lagu wargeliyo habab kale, sida raadiyaha, barnaamijka 112 Suomi iyo telefishinka.

Adeeggu ma shaqaynayaa haddii aanu taleefanku lahayn SIM-card, sida wicitaannada degdegga ah?

04 Haa. Nidaamku wuxuu shaqaynayaa xitaa haddii aanu taleefanku lahayn SIM-card.

Adeegga ma la damin karaa haddii aanad doonayn inaad hesho digniinaha?

05 Maya. Nidaamka digniinaha khatarta ah lama damin karo. Digniinaha waxaa la diraa oo keliya marka ay jirto xaalad ay lagama maarmaan tahay in dadka si degdeg ah loo wargeliyo. Sidaas darteed, waxaa muhiim ah in qof kasta oo ku sugan aagga khatartu ka jirto uu digniinta ku helo taleefankiisa.

Maxaa adeeggan cusub loo hirgelinayaa xilligan?

06 Sababtoo ah xaaladda amniga ayaa isbeddelaysa, waxaa muhiim ah in macluumaadku si degdeg ah dadka u gaaro. Gaar ahaan xaaladaha aan caadiga ahayn, waa in dadka loo digo si ka dhakhso badan sidii hore.
Habkan cusub wuxuu kaabayaa nidaamka digniinaha khatarta ah ee hadda jira, waxaana durba laga isticmaalaa dalal badan oo kale oo ka tirsan Midowga Yurub.

Luqadahee ayaa lagu soo gudbinayaa digniinaha khatarta ah?

07 Sida uu sharcigu dhigayo, digniinaha khatarta ah waxaa mar walba lagu soo gudbinayaa af Finnish iyo af Iswiidhish.

Haddii loo baahdo, digniinaha waxaa sidoo kale lagu bixin karaa luqadaha Saamiga. Suurtagalnimada adeegsiga luqado kale ayaa weli la baarayaa.

Yaa soo saari kara digniin khatar ah?

08 Go'aanka soo saarista digniinta khatarta ah waxaa mar walba gaarta hay'ad dowladeed oo awood u leh.
Hay'adaha soo saari kara digniinaha waxaa ka mid ah: Hay'adaha gurmadka iyo badbaadinta, Booliska, laalada Xuduudaha, Hay'adda Xarumaha Wicitaannada Degdegga ah (Hätäkeskuslaitos), Xarunta Badbaadada Shucaaca iyo Nukliyeerka (STUK), Machadka Saadaasha Hawada Finland, Hay'adda Kaabayaasha Gaadiidka Finland (Väylävirasto), Hay'adda Gaadiidka iyo Isgaarsiinta Finland (Traficom), Hay'adda Cuntada Finland (Ruokavirasto), Hay'adda Daawooyinka Finland (Fimea), Wasaaradaha.

Goorma ayaa nidaamka la tijaabin doonaa?

09 Nidaamka waxaa la dhammaystirayaa inta u dhexaysa dhammaadka Oktoobar iyo bilowga Nofeembar 2026. Marka la dhammaystiro, waxaa la qabanqaabin doonaa tijaabooyin ay dadweynuhu arki doonaan.
Dadweynaha waxaa horay loogu sii sheegi doonaa tijaabooyinka, tusaale ahaan bogga internetka ee pelastustoimi.fi iyo baraha bulshada ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Sidee ayay digniinta FI-Alert uga duwan tahay digniinta laga helo barnaamijka 112 Suomi?

10 Digniinta FI-Alert waxay si toos ah ugu dhacaysaa taleefannada ku yaalla aagga khatartu ka jirto, iyada oo aan loo baahnayn in barnaamij gaar ah la rakibo.
Dhanka kale, digniinaha laga helo barnaamijka 112 Suomi waxay u baahan yihiin in qofku soo dejisto barnaamijka oo uu siiyo oggolaanshaha isticmaalka xogta goobta uu joogo.
Labada hab way is-kaabayaan, waxaana suurtagal ah in digniinta khatarta ah ay taleefanka ku soo gaarto labada habba.

Xigasho: *Pelastustoimi.fi / Waaxda Gurmadka iyo Badbaadinta ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha – Digniinta khatarta ah ee FI-Alert: Su'aalo iyo jawaabo.*

EREYBIXINTA AMNIGA

TURVALLISUUDEN TUNNE DAREENKA AMNIGA	Waa dareenka qofku ku qabo inuu ammaan yahay, isla markaana aanu dareemayn khatar degdeg ah oo ku soo fool leh
EPÄVARMUUDEN SIETOKYKY AWOODDA U ADKAYSIGA HUBANTI LA'AANTA	Awoodda qofku u leeyahay inuu sii wato hawlaha iyo nolol maalmeedkiisa, xitaa marka aan wax walba la ogayn ama aan la sii saadaalin karin.
VALPPAUS FEEJIGNAAN	Awoodda lagu ogaan karo isbeddellada ka dhacaya deegaanka kugu xeeran iyo khataraha suurtagalka ah
HARKINTAKYKY AWOODDA QIIMAYNTA IYO GO'AAN-QAADASHADA TAXADDARKA LEH	Awoodda lagu qiimeeyo xaalad si deggan ka hor inta aan go'aan la gaarin ama tallaabo la qaadin.
SOPEUTUMISKYKY AWOODDA LA QABSIGA	Awoodda qofku u leeyahay inuu beddelo habka uu u dhaqmo marka xaaladdu ama duruufuhu isbeddelaan
YHTEISÖLLISYYS WADAJIRKA BULSHADA	In si wadajir ah loo shaqeeyo, la isu daneeyo, lana wada qaado masuuliyadda.
YHTEENKUULUVUUS DAREENKA KA-MID-AHAANSHAHA	Dareenka ah in qofku ka tirsan yahay koox ama bulsho, isla markaana uu qayb ka yahay.
ENNAKKOLUULOTTOMUUS KA MADAX-BANNAANIDA FIKRADAHA HORE EE TABAN	Diyaar u ahaanshaha la kulanka dad cusub, fikrado cusub iyo xaalado cusub, iyada oo aan hore looga haysan fikrado taban.
RISKITIETOISUUS KA WARQABKA KHATARAHA	Awoodda lagu aqoonsado khataraha suurtagalka ah, laguna tixgeliyo marka qofku go'aaminayo sida uu u dhaqmi doono.
HENKINEN VALMIUS DIYAARGAROWGA MASKAXEED	Awoodda lagu wajaho xaaladaha adag ama lama filaanka ah, iyadoo la isku dayayo in la ilaaliyo awoodda waxqabadka.

Varautumis- ja Maanpuolustusyhdistys ry

Amnigu qof walba wuu khuseeyaa – nagu soo biir!

Xubin ahaan, kaliya ma aha inaad daawato waxqabadka—balse waxaad fursad u helaysaa inaad barato, ka qayb gasho oo aad la dhisto Finland ammaan badan dadka kale

Buuxi codsiga xubinimada adigoo iska baadhaya QR code-ka

Macluumaad dheeraad ah:
toimisto@mvmry.fi
www.mvmry.fi

Wargeyska Kantama waxaa lagu hirgeliyaa taageerada Maalgelinta Taageerada Difaaca Qaranka iyo Maalgelinta Naadiyada Difaaca Qaranka.

Maanpuolustuksen kannatussäätiö